



Xaqa Aad U Leedahay Turjubaan


Your Right to an Interpreter

Goormaan Xaq U Leeyahay Turjubaan?

Waxaad xaq u leedahay turjubaan haddii aad tahay mid u baahan si aad u fahamto waxa socdo. Hay'adda qaata miizaaniyadaha federaaliga ama gobolka waa in ay turjubaan lacag la'aan ah siiyaan dadka aqootooda af Ingriisiga ay kooban tahay. Waxaa ka mid ah xafiisyada dawladda iyo dugsiyada, maxkamadaha, isbitaalada, waaxyada booliska iyo dab damiska, iyo hay'addaha samafalka.

Maxaan Sameeyaa Si Aan U Helo Turjubaan?

- Mid weydiiso. Wuxaad oran kartaa: “I need a Somali interpreter.” (“Waxaan u baahanahay turjubaan Soomaali ah.”)
- Haddii hay'adda diido, u sheeg in sharciga uu qoraayo in ay qasab ku tahay in ay bixiyaan turjubaan. **Waxaad tusisa qoraalka afka Ingriisiga ah ee ku yaal warqaddaan oo loo yaqaan Warqadda Xaqiqa.**



Intee Ayaan Sugaa Turjubaan?

Helidda turjubaan ma aha in ay qaadato muddo sii dheer oo keenta in aad waxtar ku weysid ama aad gaftid balan. La soco inta ay qaadato helidda turjubaanka.

Yaa Bixinaayo Qarashka Turjubaanka?

Wakaaladda aad ka raadsanaysid kaalmada ayaa bixineyso qarashka turjubaanka.

Maxaa Dhacaya Haddii Hay'adda li Sheegto In Aan Keensado Turjubaankeeyga?

Waa sharci darro in hay'adda ku weydiiso adiga in aad keensato turjubaan.

- Weydiiso turjubaan. Haddii mid aan lagu siinin, si qoraal ah u gudbi ashtako. Koobina reebo.
- Waad keensan kartaa turjubaankaada haddii aad rabtid. Hase ahaatee, hay'adda waxay dooran kartaa iney isticmaasho turjubaankeeda.
- Carruurta / inta-yaryar waa in aan loo isticmaalin turjubaan ahaan.

Maxaan Sameeyaa Haddii Aanan Fahmi Karin Turjubaanka?

Waxaad xaq u leedahay turjubaan aad fahmi kartid.

- Haddii aadan fahmi karin turjubaanka, weydii turjubaanka in uu macneeyo ama ku celiyo waxa la sheegay. Ha ka cabsanin in aad weydiiso su'aalo.
- Haddii aadan fahmi karin, u sheeg hay'adda.

Maxuu Yahay Doorka Turjubaanka?


Doorka turjubaanka waa in uu afkaaga kuugu sheego waxa la sheegaayo. **Turjubaanka ma aha u-doode**. Ayaga kaama ay caawinayaan xalinta dhibaatada, waxey kaa caawinayaan oo keliya in uu isfaham dhaco. Turjubaanka waa in uu ahaado dhexdhixaad iyo caadil. Turjubaanka waa in uu wararkaada u xafido si gaar ah.

Haddii Uu Turjubaanku Sameeyn Wixii Laga Rabay Inuu Sameeyo?

Qoraal ashtako ah u soo gudbi wakaaladda. Haddii aad u baahan tahay kaalmo, wac xafiiska Gargaarka Sharciga (Legal Aid).

Waxa Ku Saabsan Qoraalada La Turjumay?

Wakaaladda waa in ay lacag la'aan ku turjumtaa dokumeentiyada muhimka muddo macquul ah. Kuwaa waxaa ka mid ah digniinada, arjiyada, iyo maaddooyinka qoran ee muhimka ah.



Maxay Tahay Sababta Aan Xaq Ugu Yeeshay

Turjubaan?

Takooridda afka waa takoorid asal qarannimo. Waa takoorid ku saleysan waddanka aad ka timid.

- Xaqa loo leeyahay turjubaan waa **Xaq Rayid**.
- Haddii hay'adda ay maalgelisay dawladda federaalka ayan bixinin turjuban, tan waxay noqon kartaa takoorid asal qarannimo oo hoos timaada sharciga Dufcadda VI ee Sharciga Xuquuqda Shacabka ee 1964 (loo yaqaan Title VI of the Civil Rights Act of 1964).
- Hay'addaha Minnesota waa in ay bixiyaan turjubaan marka la raaco Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee MN (loo yaqaan MN Human Rights Act).

Maxaan Sameeyaa Haddii Turjubaan Aan La Keenin Ama Haddii Wakaaladda li Sheegto In Aan Keensado Turjubaankeeyga?

- Soo qaado magaca iyo kaarka ganacsiga ee qofka / wakaaladda ka horjoogsatay xuquuqdaada.
- La hadal maamulaha.
- Qor warqad ashtaka ah una dir:
 - maareeyaha hay'adda ama cutubka xuquuqda shacabka (loo yaqaan civil rights unit);
 - Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota (loo yaqaan Minnesota Department of Human Rights);
 - Hay'adda federaaliga ah ee maal geliso heyaddaas ama Wakaaladda Caaalada ee Mareeykanka (loo yaqaan US Department of Justice).
- Warqad u qor Duqa Magaalada, Guddoomiyaha Gobolka, Mudanayaashaada Kongreeska, ama wakiiladaada deegaanka ama Gobolka.
- Qoro waqtiga iyo qofka aad la hadashay. Meel ku keydso koobiyyada iyo warqadaha.
- Wac xafiisk kuugu dhaw ee kaalmada sharciyada.



Warqadaha kale ee xogta waxaad ka heli kartaa gal www.lawhelpmn.org/LASMfactsheets

Xafiiska Legal Aid ee degaankaaga waxaad ka heli kartaa. www.lawhelpmn.org/resource/legal-aid-offices

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2018 Minnesota Legal Services Coalition. Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixi aan ahayn ganaci sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo istimaalo arimo ganaci waa mamnuuc.